

## **Hadalka Kormeeraha Guud ee Guerrero ee ku saabsan Rabshadaha Qoriga iyo Saamaynta ay ku leedahay Nabadgeliyada Dugsiga**

Shalay, waa markii saddexaad muddo laba bilood gudahood ah oo qori lagu soo toogtay meel ka baxsan dhismaha Dugsiyada Dadweynaha Portland. Laba ka mid ah dhacdooyinkaas, qaar ka mid ah ardayda PPS ayaa lagu dhaawacay. Guud ahaan magaalada, isla muddadan, dad aad u tiro badan oo reer Portland ah ayaa dhibanayaal ku noqday rabshadaha sii kordhaya ee gobolkeena.

Anigoo ah macallin, waxaan u arkaa mas'uuliyaddayda koowaad inay tahay xaqiijinta nabadgeliyada iyo fayo-qabka carruurta iyo dhalinyarada aan daryeelno, iyo sidoo kale waxbarashooda. Waxaan uga mahadcelinayaa ballanqaadka iyo adeegga macalimiinteena iyo shaqaalaha taageerada kuwaas oo maalin walba naftooda u huraya xaqiijinta yoolalkan.

Laakin sida ay xabadu u saamayso bulsho kale ee PPS, waxaan ku boorinayaa bulshadeena in ay isu yimaadaan oo ay si wadajir ah uga wada shaqeeyaan xalinta dhibaatooyinka bulsho ee ragaadiyay deegaankeena.

Haddii ardaydu u baqaan ammaankooda, ama nabadgeliyada asxaabtooda, ama nabadgeliyada xubnaha qoyskooda, ma geli karaan fasaladeena iyagoo dareemaya nabadgeliyo, ammaan, iyo diyaar u ah inay wax bartaan. Haddi ay rabshadaha qoriga sii socdaan, gaar ahaan agagaarka dhismayaasha dugsigeena, ardaydu waxay dareemi doonaan walaac xoogan, halkii ay ka heli lahaayeen dareen lahaanshaha iyo nabadgeliyada. Intaa waxaa dheer, ardaydeena wali way ka soo kabsanayaan saamaynta cudurka faafa ee COVID-19: baahiyaha maskaxeed iyo dabeecadeed waxay marayaan heer aad u daran.

Dugsiyada dadweynaha, masuuliyadeena waa inaan u adeegno arday kasta oo albaabadeena ka soo galo. Barayaal ahaan, waxaan fahamsanahay in qaar badan oo ka mid ah carruurta iyo dadka waaweyn ee aan mudnaanta u leh u adeegidda ay la kulmaan caqabado badan oo dhab ah oo noloshooda ah. Waxaan ognahay in qoysaska ay inta badan la kulmaan faqriga jilka, cunsuriyadda hay'adaha, iyo caqabadaha dhaqaale ama guriyeynta. Shaqadeena waa inaan aqoonsanno caqabadahan, taageerno ardaydeena, oo aan hubinno inay helaan waxbarasho tayo sare leh. Waa caqiidadeena la wadaago, sida lagu sheegay aragtida degmadeena, in waxbarashada adag oo si fiican u dhisan ay si wanaagsan ugu diyaarin doonto ardaydeena qalin jabisay inay noqdaan mufakiriin muhiim ah, diyaarna u ah inay hogaamiyaan adduunyo bulsheed oo cadaalad ah.

Waxaan sii wadi doonaa inaan diirada saarno hubinta in arday kasta uu helo waxbarasho heersare ah. Waxaan diiradda saari doonaa hubinta in dugsiyadeena yihiin kuwo nabadgeliyo leh, soo dhawayn leh, iyo goobo xasiloon, iyo in macalimiinteena iyo shaqaalaheena ay yihiin dad ay ku tiirsan yihiin. Waxaan sii wadi doonaa la shaqaynta ururada bulshada ku salaysan iyo dhaqanka gaarka ah si aan uga caawino siinta ardaydeena adeegyada taageerada muhiimka ah iyo latalinta. Iyo waxaan sii wadi doonaa diiradda si aan u hubinno in arday kastaa og yahay in aan aaminsanahay iftiinkooda iyo kartidooda.

Tani waxay u baahan tahay inay noqoto dadaal bulshada oo dhan ah. Waxaan u baahanahay inaan ka wada shaqeyno inaan diirada saarno caruurteena iyo dhalinyaradeena, iyo inaan horumarino xalal macno leh oo dhiirigelinaya jawi nabdoon oo wanaagsan oo looga baahan yahay inay horumaraan. PPS waxay diyaar u tahay inay qayb ka noqoto xalka.



**Guadalupe Guerrero**

Kormeere